

Qoraalkan wuxuu ka hadlayaa Foomka Dib-u-dejinta ee ay buuxinayaan dadka kirada ugu jira guryaha

Foomka Dib-u-dejinta ee ay buuxinayaan dadka kirada ugu jira guryaha (Renter Relocation Form) waxayna diiwaangeliyaan macluumaadka la xiriira baahiyaha qoyskaaga waxaana isticmaala kooxda qaabilsan rarista ee Homes Victoria si ay kaaga caawiyaan inaad u guurto gurigaaga cusub.

Kooxda u qaabilsan howlaha dib-u-dejinta ee Homes Victoria ayaa kula kulmi doona si ay kuula wadaagaan macluumaad ku saabsan:

- Hawlaha dib-u-dejinta sida loo hirgelinayo
- Goorta iyo sida lagu siin doono guri cusub
- Taageerada aad heli karto
- Kharashka ku baxaya raritaanka ee wax lagaala qabanayo oo qayb ka ah guuritaankaaga.

Kooxda qaabilsan raritaanka ayaa sidoo kale ku siin doona nuqul ka mid ah foomka si aad u akhrisato, wax uga beddesho, ka dibna aad u saxiixdo.

Ma heli karaa caawimaad si aan foomka u buuxiyo?

Haa, waxaad soo kaxaysan kartaa qof ku caawiya markaad la kulmayso kooxda u qaabilsan howlaha dib-u-dejinta ee Homes Victoria. Qofkaasi wuxuu noqon karaa qof ka tirsan qoyska, saaxiib, qof daryeel bixiya ama qof la taliyahaaga ah, sida qof sharci ahaan kuu matalaya/qareen.

Ma jiraan adeegyo turjubaan?

Haddii aad ku hadasho luqad aan luuqada Ingiriiska ahayn, ama aad dhibaato kala kulanto macluumaadka qoran, markaa kooxda u qaabilsan howlaha dib-u-dejinta ee Homes Victoria ayaa kuu diyaarin kara turjubaan si aad u wada hadashaan. Turjubaanka waxaa lasoo gelin doonaa khadka taleefanka ayadoona aan adiga lagaa rabin wax lacag ah. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa **housing.vic.gov.au/interpreter-services**.

Sidee macluumaadka loo isticmaalay?

Macluumaadka ku qoran Foomka Dib-u-dejinta wuxuu caawimi doonaa Homes Victoriaa waxay caawimi doonaan kooxda u qaabilsan howlaha dib-u-dejinta ee Homes Victoria inay Diiwaanka Guryaha ee Victoria (Victorian Housing Register) geliyaan codsi ku saabsan guriga lagu bedalaayo. Dalabkaani wuxuu ka caawin doonaa kooxda u qaabilsan howlaha dib-u-dejinta ee Homes Victoria inay kuu helaan guri wax ka qabanaya baahiyahaaga. Waxaad cusbooneysiin kartaa macluumaadkii aad ku qortay foomkii aad guriga ku dalbanaysay adigoo la xiriiraya kooxda u qaabilsan howlaha dib-u-dejinta ee Homes Victoria.

Ma la heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan howlaha dib-u-dejinta?

Go'aannada ku saabsan guryaha Victoria, ayna ku jiraan go'aanada la xiriira dib-u-dejinta, waxaa loo sameeyaa si waafaqsan shuruucda iyo tilmaamaha annaga noo degan ee ku saabsan guryaha dadweynaha. Taasina waxay xaqiijinaysaa in aan adeegyada u bixinno hab joogto ah, la saadaalin karo, cadaalad ah oo loo wada siman yahay.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka dib-u-dejinta waxaa laga heli karaa Xarunta Raritaanka (Relocation Hub): **homes.vic.gov.au/relocation-hub**

Macluumaad dheeraad ah, oo ay ku jiraan shuruucda iyo tilmaamaha khuseeya guryaha dadweynaha: **<https://providers.dffh.vic.gov.au/public-housing-policy-and-practice-manuals>** iyo **<https://providers.dffh.vic.gov.au/relocation-manual>**

Sidee macluumaadkayga loo xafidayaa?

Macluumaadka aad ku bixisay Foomka Dib-u-Meelaynta ijaartaha ayaa loola macaamilayaa si waaqsan *Sharciga Baraayfasiga iyo Xeerka Ilaalinta Barayfasiga iyo Macluumaadka 2014-ka (Privacy and Data Protection Act 2014)* iyo *Xeerka Diiwaannada Caafimaadka 2001*. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan barayfasiga (privacy), wac **1300 884 706** ama iimayl u dir qaybta ra'yi-wadaagista, Kormeerka Dibadda iyo Baraayfasiga (Feedback, External Oversight and Privacy unit) cinwaanka ah **feedback@dffh.vic.gov.au**.